

Doorbidka, tayada, adeegsashada fudud

Kabitaanka buuxa ee caymiska caafimaadka ka qaado MNsure

MNsure.org
1-855-366-7873

Eeg nooca doorbidyada kabitaanka ee aad u qalantid

Isticmaalka MNsure kaliya ayaad u qalmi kartaa canshuur aan lagugu lahaanayn taasi hoos u dhigaysa lacagta caymiska bileed. Waxaad kaloo u qalmi kartaa lacag dheeraad ah ee kuu baaqata ayadoo loo marayo caawimaadda kharash-wadaagga taaso dhimayso inta ay la egtahay lacagta aad bixinaysid xilliga daryeelka caafimaadka. Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadka) iyo MinnesotaCare waxa aad heli kartaa adiga oo u mara MNsure oo wadata nacfiga midaysan.



Medical Assistance

Medical Assistance (MA) waa barnaamijka Medicaid ee Minnesota kaaso kabaya dad badan ee dhaqaalahoodu hooseeyo, siiba caruurta iyo dumarka uurka leh. Ma jirto caymis bileed ee Medical Assistance. Shaqsiyaadka u qalma waxa ay isku qori karaan Medical Assistance gebiahaamba sanadka oo idil.

MinnesotaCare

MinnesotaCare waxaa loogu kala talgalay dadka Minnesota oo dhaqaalahoodu uu horeeyo awoodna u lahayn in ay helaan caymiska daryeelka caafimaadka oo iska bixin karaan aysanna u qalmin Medical Assistance. Lacagta caymiska ugu sarraysa waa \$50/bishii qofkiiba. Shaqsiyaadka u qalma waxa ay isku qori karaan gebiahaamba sanadka oo idil.

Qorsheyaasha Caafimaadka ee la Aqoonsanyahay (QHP - Qualified Health Plans)

Canshuur aan lagu lahaanayn ayay helayaan shaqsiyaad iyo qoysas badan ee aan heli karin caymiska daryeelka caafimaadka ee shaqaaleeyaha oo ay iska bixin karaan. Si loogu qalmo, caymiska gaarka loo leeyahay waa ayadoo la iibsado ayadoo loo soo marayo MNsure. Inta ay canshuur dhimista la egtahay waxa ay ku xirantahay dakhligaaga iyo kharashka caymiska deegaankaaga.

Jadwalka hoose waxa uu muujinayaa waxa aad mudnaansho ku heli kartid taaso ku xiran inta uu yahay tirada qoyska iyo dakhliga sanadlaha.

| Tirada Dadka Qoyska | Dakhliga Sanadlaha (illaa iyo) | Dakhliga Sanadlaha* (illaa iyo) | Dakhliga Sanadlaha (illaa iyo) | Dakhliga Sanadlaha* (illaa iyo) | Dakhliga Sanadlaha (wixii ka sarreeya) |
|---|--|--|--|---|---|
| 1 | \$15,521 | \$23,340 | \$32,092 | \$46,680 | \$46,680 |
| 2 | \$20,920 | \$31,460 | \$43,257 | \$62,920 | \$62,920 |
| 3 | \$26,320 | \$39,580 | \$54,422 | \$79,160 | \$79,160 |
| 4 | \$31,720 | \$47,700 | \$65,587 | \$95,400 | \$95,400 |
| 5 | \$37,120 | \$55,820 | \$76,752 | \$111,640 | \$111,640 |
| 6 | \$42,520 | \$63,940 | \$87,917 | \$127,880 | \$127,880 |
| 7 | \$47,919 | \$72,060 | \$99,082 | \$144,120 | \$144,120 |
| 8 | \$53,319 | \$80,180 | \$110,247 | \$160,360 | \$160,360 |
| Qof kasta ee dheeraad ah ku dar | \$5,399 | \$8,120 | \$11,165 | \$16,240 | |
| *Xaddidaadyo ayaa lagu dabbagayaa MinnesotaCare iyo u qalmidda canshuur aan lagugu lahaanayn ee caymiska bilaabmaya inta ka horreysa Janaayo 1, 2015. | Medical Assistance ee dadka waaweyn: \$0/caymiska bileed | MinnesotaCare ee dadka waaweyn: illaa iyo caymiska \$50/bishii | Canshuurta aan lagugu lahaanayn ee caymiska gaarka loo leeyahay ee dadka waaweyn. Caymiska bileed waxa ay hoos ugu dhacaysaa illaa \$0 kaddib marka la eego canshuurta aan lagugu lahaanayn. | Canshuurta aan lagugu lahaanayn ee caymiska gaarka ee caruurta qaarkod. | Caymiska gaarka loo leeyahay ee lacagta caymiska bileed ee ku kala duwan nooca qorshaha. Ma laha u qalimid canshuurta aan lagugu lahaanayn. |

Suuqa MNsure

Halkaaga meel ee caymiska caafimaadka

MNsure.org
1-855-366-7873

Furitaanka iskuqorista waxa ay bilaabmaysaa Nofembar 15

MNsure waa suuq ay dadka Minnesota wax ka iibsan karaan, isbarbar dhigi karaan iyo doorankaraan caymiska caafimaadka ee baahidooda qancinaya, waana meesha kaliya ee laga helayo taakulaynta dhaqaalaha. Ayadoo lagu xirayo inta uu la yahay tirada qoyska, dadka Minnesota waxa ay u qalmi karaan barnaamijka caymiska gargaarka guud ee qiima jaban ama qorshe la qiima dhimay ee shirkad caymiska gaar loo leeyahay.



Qorshayaasha caafimaadka oo idi waxaa ku jira saddexdaan nacfi ee caafimaadka:

- Adeegyada daryeelka caafimaadka ee bukaan-socodka
- Adeegyada degdegga ah
- Isbitaal seexashada
- Adeegyada shaybaarka
- Adeegyada xaamilada iyo ilmaha
- Caafimaadka dhimirka iyo dhaqanka
- Daryeelka caafimaada ilkaha iyo aragga ee caruurta
- Daawo qorista.
- Kahortagidda iyo ladnaanshaha
- Adeegyada baxnaanista iyo habdhaqanka iyo qalabka.

Diffaacyada rukunka:

- Lagaama reebayo wax ku saabsan xalado caafimaad ee horay u jiray.
- Caymiska lama diidi karo ama in laguma soo dallaci karo lacag caymis sare sababo la xariira xaaladda taariikhda caafimaadka.
- Ma laha xaddidaad lacageed ee sanadle ama mid weligeed sii jiraysa.

Saddex siyabood ee lagu helayo caawimaadda iskuqorista lacagla'aanta ah

Xarunta Wacitaanka MNsure

1-855-366-7873

Isbeshaalisteyaal tababaran ayaad diyaar ah si ay uga jawaabaan su'aalahaaga ayadoo loo marayo telefoonka lacagla'aanta ah.

Hageyaal

Shaqsiyaad tababar ka haysta shirkado lagu kalsoonyahay ee si toos ah kuu siinaya caawimaadda arji buuxiinta iyo iskuqorista.

Wakiillada iyo Dillaallada

Xirfadlayaal tababaran iyo shati leh ee si toos ah kuu siinaya iskuqorista iyo talooyin aad ku dooranaysid qorshaha.

Raadso hageyaal, waakiilo iyo dillaaleyaal kuu dhow. Gal MNsure.org, keyword (erayga furaha): Diiwaanka Caawiyaha (Assister Directory)

